# XAASHIDA XOGTA KA QAYBQAATAHA (12+)

**AQOONSIGA IRAS: 339327**

**Go'aaminta suurtagalnimada ah in carruurta iyo dhallinyarada si aan kala sooc lahayn loogu dooro**
**Farsamooyinka muunad qaadista kaadida ee jirka wax lagu duro iyo kuwa aan u baahnayn in jirka wax lagu duro**

## Daraasadda **FROG**

### Waxaan jeclaan lahayn inaan kugu martiqaadno inaad naga caawiso daraasaddeena

- Kahor intaadan go'aansan waxaan jeclaan lahayn inaad fahanto sababta daraasadan loo sameeynayo iyo waxa ay daraasaddu ku lug leedahay.
- Dhakhtar ama kalkaaliye ayaa kuu dulmari doona xaashi xogeedkan waxaana lagu tusi doonaa muuqaal/fiidiyow.
- Fadlan weydii su'aalo ku saabsan wax kasta oo aan kuu kala caddayn.

### Waa maxay sababta loo sameeynayo daraasaddan?

Infekshinada kaadida (wee) waa wax caam ah waxayna sababi karaan carruurta inay dareemaan xumad aad u sareysa, calool xanuun, iyo matag. Marka ay dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaashu u maleeynayaan in aad qabto caabuqa kaadida waxay baaritaan ku sameeyaan kaadida.  Waxaa jira siyaabo badan oo kala duwan oo loo qaado muunada kaadida mana garanayno habka ugu fiican.

Waxaan u baahanahay caawimadaada si aan u ogaano inay suurtogal tahay in la hubiyo habka ugu fiican ee loo qaado muunada kaadida.



https://commons.wikimedia.org/wiki/File:Urine_sample.JPG

Muunadda kaadida/wee

## Waa maxay sababta la iigu casuumay inaan ka qaybqaato daraasadda?

Waa lagu casuumay sababtoo ah dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaad ee ku daryeela waxay u maleeyaan inaad qabto caabuqa kaadida iyo in loo baahan yahay baaritaanka kaadida. Dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ma hubaan habka ugu wanaagsan ee lagaaga qaadi karo muunada kaadida.

## Ma khasab baa inaan ka qaybqaato?

Maya, xitaa haddii aad oggolaato, waxaad bedeli kartaa maskaxdaada/go'aankaaga wakhti kasta.

## Maxaa dhacaya haddii aan ogolaado inaan ka qaybqaato daraasadda FROG?

Haddii aad ogolaato inaad ka qaybqaadato waxaanu uruurin doonaa macluumaad adiga kugu saabsan, habka muunad qaadista kaadida iyo daawaynta aad hesho.

Haddii aad ogolaato inaad ka qaybqaadato, kombuyuutar ayaa wuxuu si aan kala sooc lahayn u dooran doonaa habka muunad qaadista kaadida ee aad heli doonto. Waxaa jira saddex qaab oo loo qaado muunada kaadida:

- Hal wado ayaa ah inaad kaadida ku shubto weel marka aad kaadinayso.

- Wado kale ayaa ah in kaadida laga soo saaro jirkaaga iyadoo la isticmaalayo tuubo jilicsan oo la geliyo kaadiheysta iyada oo la sii marinayo caarada xubinta taranka.

- Habka kale waa in kaadida laga soo saaro kaadiheystaada iyadoo la isticmaalayo irbad lagu mudayo maqaarka calooshaada.

Dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ayaa waxay kuu sharxi karaan mid kasta oo ka mid ah hababka qaadista muunada kaadida.

Haddii aadan rabin in kombuyuutarka uu kuu dooro habka loo isticmaalo in lagu qaado muunada kaadida, taasi waa caadi. Weli waad ka qaybqaadan kartaa daraasadda FROG.

Waalidiintaada ayaa waxaa laga codsan doonaa inay buuxiyaan foomka su'aalaha.
Adiga iyo waalidiintaada waxaa la idin weydiin doonaa haddii aad xiisaynaysaan ka qaybqaadashada waraysiga ku saabsan daraasadda iyo/ama kulan lagaga hadlayo natiijada daraasadda.

## Waa maxay faa'iidooyinka laga helayo ka qaybqaadashada daraasadda?

Inkastoo aysan jirin faa'iidooyin degdeg ah, waxaa la rajeynayaa in ka qaybqaadashadaada ay naga caawin doontaa inaan helno macluumaad ku saabsan haddii aan sameyn karno daraasad ballaaran mustaqbalka si loo qiimeeyo hababka ugu fiican ee qaadista muunada kaadida.

## Waa maxay khataraha lagala kulmi karo ka qaybqaadashada daraasadda?

Dhammaan hababka baaritaanka kaadida waxaa durba isticmaala dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha. Hababka isticmaalka tuubada caaga ah iyo cirbadaha waxay noqon karaan kuwo xanuun badan, habka 'kaadi qaadista nadiifka ah' wuxuu noqon karaa mid gaabis ah oo bixiya natiijooyin aan caddayn. Dhakhtarka ama kalkaaliyaha caafimaad ayaa si faahfaahsan u sharxi kara hababka, oo ay ku jiraan muddada ay qaadan doonaan iyo xanuun baabi'iyaasha aad heli karto.

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin inaan ka qaybqaato daraasadda?

Waa iska caadi haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadato daraasadda FROG. Waxaa ku daryeeli doona dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka waxaadna heli doontaa daawaynta ay u arkaan inay adiga kuu wanaagsan tahay.

## Maxaa dhacaya haddii ay wax qaldamaan?

Isbitaalka NHS ayaa weli masuul ka ah daryeelka inta ay daraasaddu socoto. Haddii aad ka walaacsan tahay dhinac kasta oo ka mid ah habka laguula soo xiriiray ama laguula dhaqmay intii lagu jiray daraasadda FROG, fadlan la xiriir Cilmi-Baaraha degaanka (faahfaahinta lagala xiriiri karo waxay ku qoran yihiin hoos), kaasoo ku dadaali doona inuu kaaga jawaabo su'aalahaaga. Haddii aadan ku faraxsanayn oo aad rabto inaad si rasmi ah u gudbiso cabasho, waxaad samayn kartaa sidaas adigoo isticmaalaya adeegga cabashooyinka NHS ee isbitaalkaaga (faahfaahinta lagala xiriiri karo waxay ku qoran yihiin hoos). Haddii ay dhacdo inay dhibaato kaa soo gaarto ka qaybqaadashada daraasaddan, dhibaatadaas oo ay ugu wacan tahay dayacaad uu sameeyay qof, markaas waxaad haystaa sabab aad dacwad sharciga kaga soo gudbiso Queen's University Belfast laakiin waxaa laga yaabaa inaad iska bixiso kharashaadka sharciyeed ee kaaga baxaya.

### Macluumaadkayga shakhsiyeed ma badbaadsan yahay?

Macluumaadkaaga shakhsiyeed sida magacaaga iyo meesha aad ku nooshahay waxa loo hayn doonaa si qarsoodi ah oo 'gaar ah', iyadoo la ilaalinayo Xeerarka Ilaalinta Xogta Guud (GDPR). Magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka waxa kaliya lala wadaagi doonaa dadka ku lugta leh daraasadda, haddii aad ogolaato in lagu wareysto iyo/ama aad ka qaybgasho kulan.

### Maxaa ku dhici doona natiijada daraasadda cilmi-baarista?

Marka daraasadda la dhammeeyo, waxaan natiijada la wadaagi doonaa dadweynaha iyo dadka bixiya lacagta lagu maareeynayo daraasadda. Waxaan sidoo kale natiijada la wadaagi doonaa adiga iyo qoyskaaga.

### Yaa agaasimaya oo maalgelinaya daraasadda?

Daraasada FROG waxaa soo qabanqaabiyay koox dhakhaatiir ah oo ay hogaaminayaan Dr Tom Waterfield iyo Professor Kerry Woolfall. Dr Tom Waterfield waa Mutacalim Sare oo ka tirsan Queen’s University Belfast wuxuuna La-taliye ku Takhasusay Daawaynta Degdega ah ee Carruurta ee Isbitaalada Royal, Belfast, Northern Ireland. Professor Kerry Woolfall waa cilmi-baare ka tirsan Jaamacadda Liverpool. Daraasadda FROG waxaa maalgeliya Machadka Qaranka ee Cilmi-baarista Caafimaadka iyo Daryeelka (National Institute for Health and Care Research), Barnaamijka Qiimaynta Tignoolajiyada Caafimaadka (Health Technology Assessment Programme). Kafaala-qaadaha daraasadda waa Queen’s University Belfast. Kafaala-qaadaha daraasada wuxuu xaqiijiyaa in cilmi-baarista loo sameeyo si heer sare ah si loo ilaaliyo badbaadada iyo xogta bukaanka. Ma jiraan wax lacag-bixin ama magdhow ah oo ku aadan kharashyada oo ay heli karaan ka qaybgalayaasha daraasadda.

# Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad gelisay akhrinta xaashidan macluumaadka

## Faahfaahinta Xiriirka

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan daraasadda waxaad la xiriiri kartaa kooxda cilmi-baarista adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee hoose:

**Cilmi-baaraha Ugu Wayn:** *Update with local details*

Magaca: «name»
Cinwaanka: «address»
Taleefanka: «telephone»

**Cabashooyinka/tabashooyinka:** *Update with details for local complaints department and/or Patient Advice and Liaison Service..*

Magaca: «name»
Cinwaanka: «address»
Taleefanka: «telephone»

**Madaxa Cilmi-baarista:**

Magaca: Dr Tom Waterfield
Cinwaanka: «address»
Iimayl: «email»

**FROG Trial Co-ordinating Centre (Xarunta Isku dubaridka Tijaabada FROG):**

Cinwaanka: «address»

Taleefanka: «telephone»

Iimayl: «email